



Sharciga Dahliga Dawladda 2018

Waxa uu dhaqangalayaa laga bilaabo 1da Janaury

2019

Nidaamka Dakhliga 8. Xogta iyo Maareynta Diiwaanka Canshuurta Hantida maguurtada.

1. Dowlada .

1.1. Marka la eego qodobka 15 ee Sharciga Dakhliga Dawladda, Canshuurta Hantida Maguurtada waxaa lagaa raabaa in lagu qaado xogaha la soo ururiyay ee ah kuwo la dagan yahay ama la daganayan sida dhul banaan.

1.2. Awooda waxaa lagu wareejinayaagaa Agaasimaha Canshuuraha Dakhliga si loo fuliyo hawla lagama maarmaanka u ah sidii loo dhisi lahaa loona ilaalin lahaa diiwangalinta hantida Maguurtada, oo u jeedaduna tahay sidii lagu maareyn lahaa Canshuurta Hantida maguuratada ee Magaaloooyinka . Hawla noocan oo kale ah waa in la sameeyaa iyadoo lala kaashanayo Dawladda Hoose ee magaalada, waana inay ku jiraan shaqada :

1.2.1. Magac bixinta jidadka iyo lambarayn dhamaan Boosaska , iyadoo la tashanaya Dawladda Hoose.

1.2.2. Kala saarida ganacsiyada ayadoo laracayo Qodobka 6 ee Sharciga lalana xiriirinayo (Tilmamahamm Dakhliga 4) .

1.2.3. Diiwaangelinta diiwaanka elektaroonigga ah ee ku jira macluumaadka noocas ah sida loo arko waa lagama maarmaan waana in lagu maamulaa Canshuurta Magaalada.

2. Diiwaanka Hantida Maguurtada ah.

2.1. Diiwaangelinta waa in lagu sameeyaa hab elektaroonik ah waana inay noqotaa mid ka badbaado khatarta ama lumitaanka.

2.2. Foomka iyo qaab-dhismeedku waa inay ahaadaan kuwo isku dheelitiran oo la mid ah diiwaannada la midka ah ee ay hayaan FMS kale ujeedadu tahay si loo canshuuro hantida Maguurtada ah.

2.3. Daraasad cusub waa in la qabtaa afartii sanaba mar si loo hubiyo saxsanaanta diiwaanka.

A handwritten signature in blue ink, likely belonging to the Minister of Finance and Economic Development, is placed here.

2.4. Wax-ka-beddelka diiwaan-gelinta waxaa lagu sameyn karaa oo keliya qoraalka ka yimada dowlada ama Agaasimaha Dakhliga (Revenue Collection).

2.5. Hirgelinta sahanka diiwaan-gelinta waa inay ahaataa mid waafaqsan Tilmamaha Dakhliga 4, oo ay ku jirto shuruudda ah in la siiyo ogeysiis ku filan, iyo hubinta habdhaqanka wanaagsan ee sahamiyeyaasha.

2.6. Waxyabaha ku jira diiwaanka waa in loo diyaariyaa dadweynaha si loo xaqijiyo, looguna ogolaado rafcaannada la raacayo sida waafaqsan Xeerka Dakhliga 1aad.

3. **Mas'uuliyadda Canshuur-bixiyeyaasha.**

3.1. Xeerarkan wuxuu khuseeyaa dhammaan dadka degan magaalooyinka kuwaas oo la tiriay oo lagu daraaseeyay ujeedooyinka canshuurta hantida Maguurtada ah .

3.2. Waxay sidoo kale khuseysaa qofka raacaya shuruudaha ku xusan faqradda 30aad (e) ee Sharciga Dakhliga Dawladda. viz:

- Goobtu waxay leedahay guryo degaan ama ganacsi ama dhismayaal warshadeed, iyo
- Codsi ayaa loo sameeyey wasaarada mas'uulka ka ah si loo ballaariyo xuduudaha degmada ka baxsan goobta xaafadda.
- Boosas waxaa looga faaideeyay faa'iideystey danguud ama adeegyo kale waxaa mas'uul ka ah dawladda degaanka.
- Boosku waa in uu ku dhax jiraa 1 km xuduudda degmada .

3.3. Dadka deegaanka ee kor ku xusan waxay leeyihin waajibaadka soo socda.

3.3.1. Waxaa looga baahan yahay in ay iskaashi la yeeshaan sahamiyeyaal la aqoonsaday, iyaga oo u ogolaanaya inay galaan guryahooda, dibaddooda, waxay bixiyaan maclumaadka sida loo codsaday oo u oggolaanaya magaca aqoonsiga ama lambarka lagu lifaaqayo derbiga dibedda.

3.3.2. Deganayaasha ku fashilmay in ay u hoggaansamaan ama aan cidi helin waqtigii baaritaanka waxaa laga rabaa inay u soo gudbiyaan Agaasimaha Dakhliga (Revenue Collection), waxayna bixiyaan calaamadaha iyo lambarrada loo soo qoray iyo kharashkooda.

3.3.3. Dadka degan ayaa mas'uul ka ah in la hubiyo in lambarka guriga ee saxda ah uu si cad u soo bandhigayo oo uu ka muuqan karo waddada.

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Galmudug

Mudane: Saciid Siyaad Shirwac

